



SAADAASHA ROOBABKA EE SATIMAANKA 16-22 ABRIIL


Taariikh: 16 Abriil 2022

- Lyada oo weli abaar daran ka jirto guud ahaan deegaanada Puntland, haddana rajada curashada Gu'ga ee satimaankaan ayaa ah mid sarraysa.
- Gobolada Mudug, Sool, Cayn, iyo degmooyinka (Garowe, Burtinle, Dhahar, iyo Ceergaabo) ayaa la filayaa in roobabka Gu'ga ka curtaan maalmaha 18-22 ee bisha Abriil, Xaddiga roobabka la filayo ayaa celcelis ahaan u dhaxeeeya (30-40 mm),
- Degmada Jariiban iyo dhulka dhoodida ah ee Sool iyo Nugaal ayaa laga filayaa xaddi roobaad gaari kara (50-70 mm).
- Deegaanada aan curasha roobku ka muuqan satimaankaan oo ay ilaa hadda abaar aad u daran ka jirto waxaa kamid ah inta badan gobolada (Bari,karkaar,Gardafuu, iyo dhammaan degmooyinka dhaca Xeebaha Puntland).

FG: Dhammaan Bulshada reer Puntland gaar ahaan xoolo-dhaqatada, beeralayda iyo gaadiidleyda ku dhaqan deegaanada saadaasha xaddiga roobabku sarreeyo waa inay taxadar dheeriya muujiyaan kana fogaadan meelaha Biyo-mareenka ah iyo Togaga.

Sadaashan roobka waa ay isbadeli kartaa xilli kasta, Xarunta maclummaadka khayraadka Biyaha iyo Dhulka ee Dawladda Puntland waxa ay sidhow ula soconaysaa markasta isbad-badalka cimilada ee xilli roobaadka.

Khariidad 1: Saadaasha roobka todobaadka (16-18 Abriil)



Khariidad 2: Saadaasha roobka todobaadka (16 - 22 Abriil)

